

DUGSIYADA DADWAYNAHA EE SAINT PAUL

Wanaajinta dhismayaasha iskuulada dulka ay ku fadhiyaan

Bishii Meey 2014, Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul waxay bilaabidoontaa sidii ay ku wanaajin lahaayeen iskuulada dhismayaasha, iyo dhulka ay dhulka ay leeyihiin. Si taas caawimaad looga gaysto degmadu waxay samaynaysaa gudi ka kooban 60 qof si ay talooyin uga bixiyaan inta lagu jiro wakhtiga arimahaan la qorshaynayo.

Gudigaani wuxuu wax ka taridoonaa in la dhiso mustawayaal ay degmadu ku isticmaalidoonto inay go'aan kaga gaarto mashuuraca dayactirka ee ugu horeeya ee la qabanayo. Degmadu waxay haystaa 30 milyan oo doolar sanadkiiba oo ay tahay inay ku kharashgarayso kabitaanka iyo dayactirka ama wanaajinta 71 dhisme iyo dhulka ku wareegsan dhismayaashaas.

Si loo horumariyo loona wanaajiyo mustawayasha dhismayaasha, gudigu wuxuu eegidoonaa arima badan oo la xiriira dhismayaasha taas oo saamayn ku yeelankarta waxbarashada ardayda. Tusaale ahaan arimahaan waxaa ku jiri kara haddii ay ardayda interneedka galikaraan ayadoo aan loo eegayn halka ay dhismaha ka joogaan, ama haddii iskuulka uu buuxdhafay oo ay ardaydu ka badatay oo uu u baahanyanay in fasalo dheeraad ah la dhiso. Arimaha kale waxaa ka mid noqon kara haddii ay dhismayaashu u baahanyihiin inay lahaadaan qabooyije, ama haddii dhulka iskuulka ku wareegsani uu u baahanyahay meel cusub oo caruurtu ku cayaaraan qol ay ciyaaraha ku ciyaaraan.

Macluumaadka hoos ku qoran wuxuu muujinayaa sida qorshaha halka saac iyo badhka socondoono. Qoysasku waxay si wanaagsan uga qaybqaadan doonaan mashruucaan halka sano iyo badhka soconaya inta lagu Wajiga 3-aad taas oo ah wakhtiga iskuul walbaa bilaabo inuu qorshaha iskiis ah ka shaqeeyo taas oo lagu wanaajinayo dhismayaasha iyo dhulka ku wanaagsan. Wajiga 3-aad wuxuu bilaabanayaa 2015. ee hawsha halka sano iyo.

WAJIGA 1 Meey – Agoosto 2014	WAJIGA 2: Meey - Diseember 2014	WAJIGA 3: Janawari – Juun 2015	WAJIGA 4: Juun - Diseember 2015
 <p>Ururinta macluumaad muhiim ah saamayn ku yeelandoona qorshaha degmada oo wanaajinaya dhismayaalka iskuulada iyo dhulka ay ku fadhiyaan oo dhan.</p>	 <p>In la dhiso mustawayasha degmada ee loo isticmaalidoono in go'aan lagaga gaadho mashruuca ugu horeeya ee la samaynayo</p>	 <p>Iskuulada iyo dhismayaasha kale ee degmadu waxay soo saaridoonaan qorshahooda la xiriira sida loo wanaajinayo dhismahooda</p>	 <p>Qorshaha degmada ee iskuulada iyo dhisma lagu wanaajinayo ayaa ugu damyn la soo saarayaa oo lala wadaagayaa qoysaska, ardayda, shaqaalaha, hawladeenada iyo bulshada</p>